

## QEYBTA 4

Salaamo Dugsiga Degmada Gobalka DeKalb,

Waaqtiga wuu socdaa. Dib u furida dugsiyada way dhowdahay. Waxaan ku bartay degmada aniga oo qof ku qof kula sheekeysanayo shaqaalaha, hogaamada waalidka iyo qoysaska, oo aan bartay gobolkaan qurxoon oo mar ii ahaa guri.

Waxaan la kulmay isbuuc mashquul badan oo aan ku socday agagaarka Gobolka DeKalb, oo waxaan ku dhiirannahay kala duwanaanshaha. Waad ku mahadsantahay Kormeeraha guud ee Goboleedka Trenton Arnold ee ahaanshaha martigeliye wanaagsan iyo la safarkaaga oo illaa Gobolka II. Isbuucaan, waxaan booqday Dugsiga Sare Druid Hills, Dugsiga Hoose Fernbank, Dugsiga Hoose Smoke Rise, Dugsiga Hoose Idlewood iyo Dugsiga Hoose Midvale. Waxaan sidoo kale ku farxay booqashada Xarunta Soo dhaweyn Caalamiga ah iyo Xarunta Saameynta Qoyska, ee u adeego qoysaskeena iyo ardayda.

Inta lagu jiro booqashadeyda Maalinta Dalxiiska Arbacada, waxa aan horay u agaa ayaa la xaqiijiyay; Dugsiga Degmada Gobalka DeKalb dhabtii waa mid gaar. Dugsi walba wuxuu leeyahay tayadiisa gaarka ah, dhaqanka, qaabka iyo doorbiditaanka. Waxaan rajeynayaa maalinta markii aan la kulmi karo kuwa badan oo ardaydeena ah, qoyska iyo shaqaalaha.

Inaga oo usii dhawaaneyno maalinta weyn, Agoosto. 17, oo niyada ku hay in iyada oo nolosha kala duwantahay, waxbarashada weli waa albaabka lagu aado caalam weyn. Waxaan weli heleynaa fursada lagu baranayo, lagu gaarayo, lagu riyoonyo, lagu kobcayo iyo qorshooyin lagu sameynayo. Rajadeyda waa mida aad u dabaaldageysid Ku laabashada Dugsiga 2020 onleen ahaan, oo u diyaar garow sannad farxad leh sababtoo ah wadajir Waan Aamini Karnaa oo Waan Gaari karnaa, xittaa haddii aysan caadi aheyn. Weli waan xiiseynayaa waxbarashada fogaanta. Waan ogahay in macalimiinteena ay hormarinayaan fursadaha ka qeybgelinta ardaydooda.

Waxaan rabaa inaan mahad celin gaar ah siiyo shaqaalaha u adeegay sida madaxa ku meelgaarka ah ee waaxda shaqaalaha—labo jeer—oo u hogaamiso degmadaan dhiiranaan iyo dhoola cadeyn. Maanan garaneyn muddo dheer, laakin waan ogahay in loo xiisayo. Marwo Linda Woodard, waad ku mahadsantahay adeegaaga. Waxaan idin rajeynayaa kuwa ugu wanaagsan ee dadaalada xiggo.

Ugu dambeyn, qoyska DeKalb, waxaan rajeynayaa inaad nagula soo biirtid warbaahinta bulshada (Facebook, Twitter, iyo Instagram) Agoosto 10-13, inaga oo u diyaar garoobeyno sannad dugsiyeedka cusub. U diyaar garow inaad soo saartid sawirada madadaalada qaar oo aad wadaagtid xasuusyada wanaagsan iyo tallooyinka qaar.

Waad ku mahadsantihiin dhammaan jawaab celintaada inta lagu jiray sadexdii isbuuc ee la soo dhaafay. Ka fiiri taxadarka gaarka ah ee Rugta Saameynta Qoyska.

Hogaankaaga kooxda ee #1,

Cheryl Watson-Harris, Kormeeraha guud